



2020-04-03

Warbixin ku socota waalidiinta oo ku saabsan xaaladda hadda taagan ee dugsiyada iyo xanaanooyinka degmada Ludvika, 2020-04-03

Toddobaadkii la soo dhaafay dugsiyada iyo iskoolada xanaanada ayaa lagu sameeyay dib u eegis dheeraad ah oo ku saleysan covid-19 waxaana isbeddel lagu sameeyey meelaha sida aadka ah ay caruurta iyo ardeydu ugu kulmaan sida lookaalada cuntada, waxaana loo sameeyey nidaamyo cusub.

Xaaladda shaqaalaha xanaanada iyo dugsiyada ayaa isbeddel ku yimid asbuucan. Waxaa aad u sareeyey maqnaanshaha shaqaalaha, sidaa daraadeed waxaan ku guubaabineynaa kuna dhiirigelineynaa shaqaalaheena iney si dhab ah u qaataan talooyinka ay soo jeedinayaan maamulka hay`adda caafimaadka dadweynaha. Guriga joog haddii aad isku aragto astaamo xanuun.

Maqnaanshaha shaqaalaha waxay abuuraysaa baahida loo qabo in la qaado tallaabooyin dheeraad ah oo ku saabsan habsami u socodka shaqada, sida in la isku daro guruubyada ,in isbeddel lagu sameeyo jadwalka, joojinta casharrada dabbaasha, banaan joog dheeraad ah, saacadaha dugsiya oo la gaabiyo.

Waxaan sidoo kale dareemaynaa in xiriirkii ka dhaxeeyey goobaheena shaqada iyo guryaha uu ahaa mid aad u wanaagsan. Waxa aan arki karno waa isbeddelka ku dhici kara shaqaalaha, maamulku wuxuu kaloo u baahnaan karaa inuu qaado tallaabooyin dheeraad ah mustaqbalka.

Xaaladda hadda jirta awgeed, maamulku wuxuu ka rajeynayaa qof walba inuu qaato mas'uuliyadiisa uuna raaco tilmaamaha iyo talooyinka. Guriga joog haddii aad isku aragto astaamo xanuun, carruurta caafimaadka qabta iyo ardaydaba waxay sii wadan doonaan inay dugsiya yimaadaan.

Hälsningar
Jessica Carlberg
Verksamhetschef skola

Ulrika N Eriksson
Verksamhetschef förskola